

## Caawinta dhammaan carruurta in ay raacaan rabitaankooda ciyaaraha

Miisaaniyadda 2024 waxay qaadeysaa caqabadaha dhaqaale ee hortaagan ciyaaraha iyo nashaadaadka madadaalada si loo hubiyo in ilmo kasta oo reer Alberta ah uu helo fursad uu ku sii wado hamigiisa ciyaaraha.

Ciyaaruhu waxay door muhiim ah ka ciyaaraan marxaladaha hore ee nolosha ilmaha. Waxay baraan carruurta caadooyinka caafimaadka qaba iyo xirfadaha nolosha aasaasiga ah sida wada shaqaynta, hoggaaminta iyo ballanqaadka u dejinaya guusha nolosha. Haddii Miisaaniyadda 2024 la ansixiyo, dawladda Alberta waxay siinaysaa \$8 milyan oo Parnaamijka Ilmo kastaa wuu Ciyaari karaa. Barnaamijku wuxuu meesha ka saarayaa caqabadaha haysta qoysaska reer Alberta ee gobolka oo dhan wuxuuna ka dhigayaa ciyaaraha carruurta iyo hawlaha madaddaalada kuwo la heli karo oo la awoodi karo.

"Fursadaha isboortiga iyo madadaalada waa inay noqdaan kuwo la awoodi karo oo la heli karo dhammaan, gaar ahaan carruurta yaryar iyo dhalinyarada. Qayb muhiim ah oo ka mid ah korriinka, cayaaruhu waxay barayaan shaqada kooxeed, waxay dhistaa kalsoonida waxayna kor u qaaddaa qaab nololeed caafimaad leh oo si wanaagsan ugu jiri kara qaangaarnimada. Waxaan ku hanweynahay in dawladda Alberta ay taageerto qoysaska heli kara isboorti, iyadoo hubinaysa in barnaamijka ilmo kasta uu ciyaari karo kuwa aadka u baahan."

*Joseph Schow, Wasiirka Dalxiiska iyo Ciyaaraha*

"Ciyaaruhu waxay door muhiim ah ka ciyaaraan wanaagga jireed iyo maskaxeed ee carruurta. Aad ayaan ugu faraxsanahay barnaamijkani wuxuu u fududayn doonaa oo aad u jaban doonaa carruurta si ay ula xiriiraan asxaabtooda, lataliyeyaal iyo bulshooyin siyaabo caafimaad leh. "

*Searle Turton, Wasiirka Adeega Caruurta iyo Qoyska*

"Aad ayay muhiim ugu tahay carruurta Alberta inay helaan fursado isboorti iyo madadaalo la awoodi karo. Waan ku faraxsanahay inaan arko sida Miisaaniyadda 2024 ay u jebinayso caqabadaha dhaqaale ee qoysaska Alberta si carruurtoodu ay u helaan fursado dhisi doona xusuusta nolosha dheer iyo caadooyinka caafimaadka leh."

*Nathan Neudorf, Wasiirka Wax-Qabadyada iyo Adeega*

Iyada oo loo marayo barnaamijka Ilmo kasta wuu Ciyaari karaa, qoysaska xaqa u leh waxay ka dalban karaan Ciyaaraha Caruurta Alberta (KidSport Alberta) taageero si ay uga diiwaangeliyaan carruurtooda ee ciyaaraha iyo nashaadaadka madadaalada. Intaa waxaa dheer, ururada aan macaash doonka ahayn ee gobolka iyo bulshada waxay codsan karaan maalgelinta deeqda si ay u kordhiyaan gelitaanka barnaamijyada ciyaaraha iyo madadaalada. Sannadkii hore, barnaamijku waxa uu geliyey \$8 milyan si uu wax uga beddelo nolosha in ka badan 8,500 oo carruur iyo dhallinyaro ah iyada oo la taageerayey ilaa 50 carruur iyo barnaamijyo heer bulsho ah oo diiradda saaraya dhammaan Alberta.

caawinta carruurta Alberta inay ku guulaystaan ka mid noqoshada oo ay tusaan aduunka in ciyaaruhu u yihiin qof walba. Ururadani waxay caawiyaan inay ku xidhaan carruurta Alberta fursadaha beddelka nolosha iyo waayo aragnimada si fiican ugu dhiirrigelisa qaan-gaarnimada.

Miisaaniyadda 2024 waa qorshe mas'uul ah si loo xoojiyo daryeelka caafimaadka iyo waxbarashada, loo dhiso bulshooyin badbaado leh oo taageero leh, loo maareeyo kheyraadka gobolka si caqli leh oo kor loogu qaado shaqo abuurka si loo sii wado dhismaha faa'iidada tartanka Alberta.

## **Xaqiiqooyin degdeg ah**

- Barnaamijka Ilmo Kasta wuu Ciyaari karaa waxa uu ku dhismaa guusha maalgashiga dawladda ee \$4.5 milyan doolar sanadka 2022 ee barnaamijka Ku Noqoshada Ciyaarta ee loogu talagalay in lagu dhiirigaliyo ka qaybgalka ciyaaraha, dhaqdhaqaaqa jidhka iyo madadaalada ee qoysaska haysta caqabadaha dhaqaale.

## **Related information**

- Ciyaaraha Caruurta Alberta ([KidSport Alberta](#))

- Barnaamijka Ilmo Kasta wuu Ciyaari karaa ([Every Kid Can Play Program](#))

## Warbaahinta kala duwan

- Daawo warka shirarka ([Watch the news conference](#))

## Weydiimaha warbaahinta

**Kevin Lee**

587-785-4366

Xoghayaha Warfaafinta Dalxiiska iyo Ciyaaraha